



14 December 2019

HANNAANKA IYO HABRAACA DIIWAANGELINTA URURRADA SIYAASADEED EE PUNTLAND

1. Guddiga Doorashooyinka ee KMG ayaa ka masuul ah qabashada araaajida diiwaangelinta ee ururada siyaasada iyo xafidaada dukumantiyada ay u soo gudbiyaan ururradu.
2. Guddiga Doorashooyinka ee KMG waxay ku baahinaysaa warbaahinta dalka bilowga muddada qabashada codsiyada diiwaangelinta ururrada siyaasadeed oo ka bilaabanaysa **15ka December 2019.**
3. Wakhtiga kama danbeysta ah ee la qabanayo araaajida waa **05:00** Galabnimo ee maalinta ugu danbeysa qabashada araaajida oo ah **15ka March 2020.**
4. Foomka qabashada araaajida waa inuu saxiixo madaxa ururku waxana lagu soo ridayaa labo bushqadood oo ay korka kaga qoran yihiin Asal (original) iyo nuqul (copy).
5. Muddada Qabashada Codsiyada Diiwaangelintu waa **Sadex bilood** oo ka bilaabanta **15ka December 2019.**
6. Urur kasta oo doonaya in loo diiwaangeliyo urur siyaasadeed waa inuu ku soo qortaa arji foomka loogu talagalay, kuna soo hagaajiyaa Guddiga isagoo arjiga ku lifaaqaya caddaymaha iyo qoraalada soo socda: -
 - a. 10 Nuqul oo daabacan oo ah xeerka ururka.
 - b. Liiska magacyada aassaasayaasha ururka.
 - c. Liiska Assaasayaasha Ururka iyo Xeerka ururka waa in lagu soo hor saxiixaa Nootaayo sharciyeysan.
 - d. Golaha Dhexe ee Ururka/ Xisbiga waxaa laga dooranayaa shriweyanaha ugu horeeya ee Ururka/Xisbiga.
 - e. Caddeyn maqal iyo muuqaal ah oo muujinaysa goortii iyo goobtii ururku ku qabtay shirkii assaaska ururka ee ugu horeeyay.

- f. Liiska Magacyada Guddida fulinta ee Ururka
 - g. Qaab-dhismeedka ururka oo ay ku caddahay magaca ururka oo dhan iyo habka uu u qormayo marka la soo gaabiyo, calaamadaha ururka iyo hal-ku-dheggiisa.
 - h. Cinwaanka ururka oo dhamaystiran sida: Telephone, Emailka, Xafiiska ururka, IWM.
 - i. Caddeyn bixin deebaaji dhan **\$3,500** (Sadex kun iyo shan boqol oo Dollar) oo aan celis lahayn, waxaana lagu shubayaa bangiga dhexe ee dawladda Puntland.
 - j. Magacyada 2 qof oo xirriiyaal ah iyo cinwaannadooda (Telephone iyo Email)
7. Waxaa laga raba urur kasta inuu guddiga doorashooyinka ka hubiyo in magaca iyo astaanta uu wato aan urur kale horey u qaadan.
 8. Waxaa araaajida lagu soo hagaajinayaa xarunta dhexe ee Guddiga Doorashooyinka Puntland oo ku taala Magaalada Garoowe oo ku aadan galbeedka xarunta Baarlamaanka. Foomamka waa in la keeno xarunta dhexe ee Guddiga. Waxa uu Guddigu siinayaa urur kasta markuu keeno araaajida **caddeyn muujinaysa ka qabashada arjiga**. Waxaa kaloo ururka ku waajib ah inuu qaato caddeynta.
 9. Waxaa lagu wargelinayaa ururrada inay araaajidooda ku keenaan muddada loo cayimay.
 10. Urur/xisbi kasta waa inuu xubin ka noqon karo qof kasta oo ah muwaadin Puntland ah.
 11. Urur/xisbi kasta oo siyaasadeed waa in xeerkiisa ku caddahay ku dhaqanka dimoqraadiyadda iyo talo-wadaagga, hogaamintuna ay ku timaadaa doorasho xor ah.
 12. Urur/xisbi kasta waa in xeerarkiisu waafaqsan yahay shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale Puntland.
 13. Araajida iyo lifaaqyada la socoda waa dukumantyo ummadedd (Public document). Guddigu wuxuu xaq u leeyahay inuu weydiisto madax aururka wixii macuulmaad dheeraad ah ee uu u baahdo.
 14. Xoghayaha Guud ee Guddiga, ama xubin ka tirsan GDP ee KMG oo Guddigu u idmado marka uu maqanyhay xoghayaha guud ayaa ka qabanaya ururrada araaajida.
 15. Mudada u dhexaysa **16 March 2020 ilaa 31 March 2020** waxaa loo qoondeeyay in guddigu sameeyo hubin ururku inuu buuxiyay shuruudaha ku qoran xeerka ururada/ xisbiyada siyaasadeed ee Dawladda Puntland. shuruudaha lahubinayo waa:
 - a. Goortii iyo goobtii ururku ku qabtey shirkii golaha dhexe ee ugu horeeyay ururka. Caddeyn maqal iyo muuqal ah oo muujinaysa qabashada shirka golaha dhexe iyo qaabkii loo doortay hogaanka ururka.
 - b. Liiska ciwaanada xarumaha ururka ee gobolada iyo degmooyinka dalka.

- c. Liiska taageerayaasha ururka ugu yaraan **6-Gobol** oo ka mid ah **9-ka** Gobol ee Puntland gobol walba waxaa laga rabaa ugu yaraan **300** oo taageere oo buuxiyey shuruudaha codbixinta.

16. Sida ku qoran Dastuurka Puntland waxaa reeban ururada iyo xisbiyada leh muuqaal ciidan ama qabiil.

Guddiga Doorashooyinka Puntland ee KMG.

Xarunta Dhexe ee Guddiga